



Pastoral & Environmental Network in the Horn of Africa



Codsiga PENHA Somaliland ee Dhibaatooyinka COVID-19

Dhibaataada Covid-19 waxay curyaamisay dhaqdhaqaaqyo badan, dhinac bulsho iyo mid dhaqaaleba gudaha Somaliland.

PENHA waxay raadineysaa taageeradaada deg-degga ah si dhibaatan looga caawiyo bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah, iyadoo ay uga sii dartay duulaanka ba'an ee Ayaxa (Locust), kaasoo baabi'iyay gabi ahaan dalagii beeraha.

Sheekada

Dhibaataada COVID-19 waxay saameyn ba'an ku reebtay bulshooyinka xoolo-dhaqatada iyo beeralayda Geeska Afrika. Dad badan ayan haysan kayd-dhaqaale ama aan haysanba, waxayna ku tiirsan yihiin dakhliga maalinlaha ah, kaasoo hadda meesha ka baxay.

Barnaamijyada cunto qaybinta ayaa ujeedadeedu tahay in lagu buuxiso gol-daloolada, iyadoo ay hay'adaha aan dawliga ahayni (NGOs) u beddelayaan maalgalintoodi lacageed mid ay wax uga qabayaan dhibaataada COVID-19. Inkastoo in badan oo ka mid ah bulshooyinka ay abaarayso Shabakadda Xoolo-dhaqatada iyo Deegaanka ee Geeska Afrika (PENHA) oo ku nool Somaliland wajahayaan dhibaato aad u daran iyo kalsooni darro. Bulshadu iyagaa iscaawiya, sida caadada ahaydba waligood, hase ahaatee shabaqa-badbaadada bulshada ayaa cidhiidhi daran ku jira.



PENHA waxay u baahan tahay caawimaadaada degdega ah si loo abaabulo shabakadaha maxalliga ah sida:

- U fidinta taageero deg-deg ah kuwa ugu waxyeellada badan iyo kuwa nugul;
- Abuurka wacyiga-galinta iyo fahamka Covid-19 ee bulshada dhexdeeda;
- Inay caawimadu noqoto mid hufan oo wax ku ool ah oo lugna leh bulshada, iyadoo la hubinayo in caawimadu si buuxda loogu wargaliyo aqoonta maxalliga ah ee ku saabsan shuruudaha gaarka ah ee deegaannada kala duwan;
- Horumarinta istiraatiijiyad wadaaga oo ku saabsan wacyi-galinta COVID 19, taasoo usaamaxeysa shirkadaha maxalliga ah inay shaqeeyaan, iyadoo la shaqeynaya hay'adaha caalamiga, kuwa qaranka iyo kuwa maxalliga ah.

[La wadaag asxaabtaada](#)